Minnesota Department of Health


# Cudurka TBda Firfircoon

Haddii uu baaritaanka ka soo baxo inaad qabtid cudurka qaaxda TB firfircoon, waa inaad ogaataa arrimahan:

- TB waa cudur halis ah oo lagu daaweyn karo daawo iyo **daaweyn haboon**.
- Dadka qaarka qaba cudurka TB ayaa ku faafin kara dadka kale.

## Sidee baan TB ku qaaday?


Qof kasta wuu qaadi karaa TB. Marku qufaco, hadlo, ama hindhiso ruuxa qaba TBda sambabka jeermiskii ayaa ku fidaya hawada.  Qofkii u dhaw ayaa jeermisku u raacayaa neeftiisa ilaa sambabka. Laguma kala qaado TB salaan gacan-qaad ah, cuntada, weelka, gogosha iyo waxyaalo kale.



Marka jeermiska TB jirkaaga galo, wuu jiifsadaa. Jeermiska jiifa waxba ma yeelo jirka, cudurna kuuma keeno. Kaas waxa la yidha "**TB qarsoon"** ama "**LTBI."** LTBI wuxu jiri karaa muddo gaaban ama sannado badan. Waxaad u bukoon kartaa TB markuu tooso jeermisku ee bilaabo inuu kobco oo waxyeelo jirkaaga. Kaasna waxa la yidha **TB firficoon**.

## Sidee buu cudurka TB u saameeyaa jirkayga?

Cudurka TB sida badan wuxu saameeyaa sambabka (TBda Sambabka). TBda Qaaxada wax waa yeeli kartaa qaybaha kale ee jirkaaga.




Meelaha cudurka TB ku dhacdo

Dadka qaba cudurka TB waxay yeelan karaan hal ama dhawr **astaamahan** oo kake ah:

- Qufac 3 todobaad ama in ka badan
- Culayskaaga oo dhaca
- Rabitaanka cuntada oo yaraada
- Dhidid habeenkii
- Qandho
- Dhaxan
- Dareen daal ama taag-darro
- Xabbadka oo ku xanuuna
- Qufac dhiig leh ama wax kale oo carun ah oo ka yimaada sambabka

## Sidee Takhtaradu u baaraan TB?

Waxaad u baahan karta in ka badan hal baaritaan cudurka TB:

- **Baaritaanka maqaarka ee Mantoux** wuxuu sheegaa in jeermiska TB ku jiro jirkaaga, haddii ay xataa qarsoon yihiin.
- **Raajatada xabbadku** waxay sheegtaa in jeermisku wax yeelay sambabkaaga.
- **Baaritaanka Sputum culture** waxay sheegtaa in jeermiska TBdu ku kobcayo sambabkaaga.

## Sideen ku raysan karaa?

- Waa inaad Takhtar aragto oo qaadato daawada u gaarka ah **TB** ee disha jeermiska.
- **Jeermiska TB waa xooggan** yahay in badanna wuu nooladaa. Waad roonaanaysaa usbuucyo ka bacdi markaad qaadatid daawada TB. Si loo hubiyo in jeermiskii TB oo dhan la dilay **waa inaad qaadato daawada ugu yaraan** 6-9 usbuuc.
- Waa muhiim **inaad takhtarka aragto bil kasta** ilaa ay ku dhamaanayso daawadu. Takhtarku wuxuu ku baari doonaa si loo hubiyo inaad raysatay, suaalona waa lgu weydiin sidaa dawadu kugu tahay ee ka jawaab.

## Maxaa dhacaya haddaan daawada qaadan waayo?

Jeermiska TB waa xooggan yahay. Hadii aanad daawada si fiican u dhamaysan mar **kale ayaad jirran kartaa**, **cudurkana** waad ku faafin kartaa dadka kale

Waa **inaad daawaada u qaadato sida** takhtarku ku faro si aad u raysato, haddii kale, TB wuu sii xoogaysan karaa. Markaana waa inaad qaadato daawo ka tayo badan tii hore muddo dheer.

# Cudurka TBda Firfircoon - bogga 2

## Waa maxay DOT?

"DOT" waa Si-toos uga war-haynta Daaweynta. DOT waxay fudaydisaa qaadashada kiniinka. DOT waa marka kalkaaliyaha ama shaqaalaha caafimaadku ku arko ee ku siiiyo daawada TB. Waa sida ugu fiican ee loo hubin karo inaad dhamaan qaadatay daawadii aad u baahnayd oo aad raysanayso Haddii dhib ka timaad daawada waa la xallin karaa isla markiiba.

**DOT waxay daaweysaa TB**

## TB ma ku faafin karaa dad kale?

Haddii TB ku jirto sambabkaaga waa inaad ka ilaaliso jeermiska dadka kale.  Haddii TB ku jirto qaybaha kakle ee jirka lagama yaabo in ay ku faafto dadka kale.

Warso takhtarkaaga haddii jeermiskaaga TB ku faafi karo dadka kale (la kala qaado). Waxay kuu sheegi waxaad fali lahayd si aad u badbaadiso dadka kuu dhaw.

Dhawr usbuuc ka bacdi markaad qaadato daawo ee aad roonaato ma faafin kartid cudurka. Takhtarkaaga ayaa ku sheegi markaad ku noqon karto shaqada, dugsiga iyo hawlaha kale.

## Maxaa kale ee aan ka ogaan karaa TB?

- Warso takhtarka ama kalkaaliyaha **daawada bilaashka ah ee TBda** ee laga helo waaxda caafimaadka ee Minnesota.
- U sheeg takhtarka ama kalkaaliyaha haddii aad damacdo inaad u guurto magaalo ama gobol kale. Waxay hubin doonaan sidii aad ku heli lahayd daaawo.markaad guurto.
- Haddii aad TB qabto, takhtarkaaga u sheeg inuu kaa **baaro HIV.** Dadka qaba HIV aad ayey ugu bukuun karaan TB. Waxaad u baahanaysaa dawo nooc kale ah haddii aad qabto HIV.

**Xussus…TB waa la daaweyn karaa!**

## Maxaan ka ogaan karaa daawada TB?

- Sida badan dawada qaaxada TB khatar ma leh, laakiin dadka qaar ayey si dadban u saameysaa. **Hadii aad isku aragto astaamahan oo kale, u wac ama arag takhtarkaaga si deg deg ah:**
  - Matag, calool xanuun
  - Rabitaan la'aan cunto
  - Lallaboa
  - Indhaha ama maqaarka oo jaalle noqda
  - Faraha lugaha ama gacmaha oo jiriricooda
  - Afka oo jiriricooda ama kabuubyooda
  - Aragtida oo is-bedesha ama hayhayr yeelatya
  - Dhagaha oo shanqar yeesha
  - Maqal xumo
  - Dawakhsanaan
  - Xubno xanuun
  - Qandho ka badan 3 maalmood
  - Nabarro ka soo baxa maqaarka
  - Dhiigbax ama si fudud nabar u yeelasho
- Qaado dhamaan daawada TBda **isla waqti maalin kasta.**
- Wad qaadashada dawada TB ilaa takhtarku ku yiraa jooji.
- **Ha cabin biir, nabiid iyo khamri** intaad daawada TBda qaadanayso.

**Bukaan-socod/takhtar/kalkaaliye:**

______________________________________

______________________________________

**Telefon #:** (_____)______________________

**Kiniinkaaga TB waa:**

___ Isoniazid ("INH")
___ Rifampin
___ Pyrazinamide ("PZA")
___ Ethambutol
___ Vitamin B6
___ _______________
___ _______________

MINNESOTA MDH DEPARTMENT OF HEALTH

Tuberculosis Prevention and Control Program
P.O. Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
651-201-5414
1-877-676-5414
www.health.state.mn.us/tb

6/2005